# Faallo Kooban 19

Oktoobar 2022

# Soo If-bixitaanka Dhallinyarada Ciyaal Weero ee Muqdisho

**Maxamed Aadan**


## Soo koobid

Kooxo dhalinyaro ah oo da'doodu u dhexeyso 15 ilaa 35 sano jir – oo loo yaqaano Ciyaal Weero – ayaa kasoo shaac baxay degmooyinka Muqdisho dabayaaqadii 2021. Dhallinyaradan ayaa adeegsada hubka fudud iyo sidoo kale bastoolado (iyo toosh iftiin xooggan leh oo ay dadka indhaha uga qabtaan) mararka qaarna bajaaj si ay u dhacaan dadka, inta badan wakhtiyada habeenkii. Shaqo la'aanta, isticmaalka maandooriyaha, iyo dowladda hoose oo daciif ah ayaa loo arkaa inay yihiin sababaha ugu waaweyn ee qeyb ka qaatay soo if-bixidda Ciyaal Weero. Nidaamka garsoorka oo aan awood xooggan laheyn, isgaarsiinta iyo tignoolajiyadda, baraha bulshada, iyo isticmaalka heshiska aan tooska ahayn oo laga galo dhibaatooyinka ay geystaan ayaa la aaminsan yahay inay qeyb ka qaateen soo if-bixitaanka Ciyaal Weero ee caasimadda Soomaaliya. Inkastoo ciidamada boolisku ay bilaabeen howlgalka "Samakaab" ee ka dhanka ah Ciyaal Weero, haddana dowladda kuma guuleysan inay yareyso khatarta kooxaha dhallinyarada ah. Tan iyo markii ay soo if-bexeen Ciyaal Weero, magaalada Muqdisho waxaa lagu dilay dad isugu jiray macalimiin iyo arday, waxaana ay xaddideen dhaq-dhaqaaqa dadka ku dhaqan xaafadaha Muqdisho. Faalladan kooban waxa ay falanqeyneysaa waxyaabaha sababay soo if-bixitaanka Ciyaal Weero, saameynta ay ku yeesheen amniga iyo isu-socodka magaalada Muqdisho, waxa ay sidoo kale faallada soo bandhigeysaa talooyin tixgelin mudan oo ay kamid yihiin xakameynta maandooriyaha dalka soo gala, dejinta istaraatiijiyad dowladeed oo wax lagaga qabanayo kooxaha dhalinyarada ah, iyo abuurista fursado shaqo.


## Hordhac

Ciyaal Weero waa kooxo dhalinyaro ah oo kasoo if-baxay gobolka Banaadir dabayaaqadii sanadkii 2021. Da'da celcelis ahaan ee xubnaha kooxdan ayaa lagu qiyaasaa 23 sano. Inkastoo markii hore ay ku bilowdeen qaab xifaaltan xaafadeed ah oo u dhexeeya dhallinyarada da'doodu ka hooseeyso 19 sano, dhallinyaro waaweyn oo hubaysan ayaa markii dambe ku biiray. Dastuurka kumeelgaarka ah ee Soomaaliya waxa uu u yaqaannaa caruur qofka ay da'diisu ka yar tahay siddeed iyo toban sano. Kooxahan burcadda ah oo ku hubeysan hubka fudud ayaa si gaar ah uga howlgala xaafadaha degmooyinka ku yaalla daafaha magaalada Muqdisho. Degmada Kaaraan oo kamid ah demooyinkaasi ayaa kamid ah meelaha ay ku badan yihiin kooxaha burcadda ah, waxaana la rumeysan yahay inay kamid tahay goobihii ugu horeeyay ee kooxahaasi ay kasoo if-bexeen. Kaaraan waxa kale oo loo arkaa in ay tahay saldhiga ugu weyn ee Ciyaal Weero.

Kooxdan ayaa isticmaasha hub fudud oo kala duwan. Waxaa kamid ah mindiyo, baangado, toorey, iyo ulo. Waxaa intaa dheer, burcadda qaarkood waxay ku hubeysan yihiin bastoolado iyo qoryaha darandooriga u dhaca. Sidoo kale, qaar kamid ah xubnaha kooxahan waxa ay isticmaalaan tooshash ay dadka indhaha uga ifiyaan si ay u jah-wareeraan marka ay doonayaan in ay dhacaan.

Waxaa jira siyaabo kala duwan oo ay burcaddu hubka ku helaan. Mindiyaha, ulaha iyo baangadaha, waa raqiis, si fudud ayaa lagu heli karaa, waxaana lagu iibiyaa inta badan suuqyada Muqdisho. Dhanka kale, waxaa la rumeysan yahay in Ciyaal Weero ay siyaabo kala duwan u helaan hubka. Qaar kamid ah askarta dowladda ayaa la fahamsan yahay in ay ku biireen Ciyaal Weero iyagoo hub wata kana qeyb qaataan dhaca, waxa ayna sidoo kale qeyb ka helaan waxyaabaha lasoo dhoco. Intaa waxaa dheer, waxaa lagu eedeeyay in qaar kamid ah qoryaha loo isticmaalo fal-dembiyeedyadan lagasoo amaahdo askarta dowladda kadibna dib loogusoo celiyo. Sidoo kale, askarta Ciyaal Weero ay qoriga kasoo amaahdaan ayaa qeyb kamid ah hantida la dhacay la siiyaa. Waxaa kaloo xusid mudan in hubka si fudud looga heli karo magaalada Muqdisho.

Si loo fahmo sababihii keenay soo if-baxa Ciyaal Weero wacyina loo abuuro, Somali Public Agenda (SPA) ayaa madal looga hadlayay soo if-baxa Ciyaal Weero ku qabatay magaalada Muqdisho 1-dii Sebteembar 2022. Doodda waxaa la qabtay xilli uu ciidanka booliska isku dayayay in uu la tacaalo dhibaatada ay dhallinyaradan ku hayaan shacabka islamarkaana uu billaabay howlgal loogu magac daray 'Samakaab' oo ka dhan ah Ciyaal Weero. Inkastoo howlgalka 'Samakaab' uu socday muddo bilo ah, haddana booliska weli sooma afjarin khatarta kooxahan dhalinyarada ah.

## Ku saabsan Somali Public Agenda

Somali Public Agenda (SPA) waa hay'ad aan macaash doon ahayn oo ka shaqeysa cilmibaarista arrimaha jaangoynta iyo maareynta siyaasadaha dalka xarunteeduna tahay magaalada Muqdisho. Ujeedka hay'adda waa hagaajinta maamulka dowliga ah iyo horumarinta adeegyada dowladda ee Soomaaliya iyadoo loo marayo cimibaaris iyo falanqeyn aqoon ku dhisan.

**www.somalipublicagenda.org**

© 2022 Somali Public Agenda

Daneeyayaal muhiim ah ayaa kasoo qeyb galay madasha SPA oo ka kala socday qeybaha kala duwan ee bulshada sida macalimiin, arday, xubno ka socday bulshada rayidka, wakiilo ka socday xarumaha lagu barto farsamada gacanta, ururrada dhalinyarada, madaxda ururrada dhalinyarada ee ugu yaraan todobo degmo oo ka tirsan gobolka Banaadir oo ay ku jiraan qaar kamid ah degmooyinka iyo xaafadaha ay dhibaatada ugu badan ka jiraan sida Kaxda, Yaaqshiid, iyo Darusalaam. Faalladan kooban waxa ay falanqeyneysaa qaar kamid ah arrimihii ugu muhiimsanaa ee madasha lagu falanqeeyay.

## Sababaha Keenay Soo If-baxa Ciyaal Weero

**Shaqo La'aanta iyo Isticmaalka Maandooriyaha:** Soomaaliya waxay kamid tahay dalalka ugu sarreeya heerka shaqo la'aanta dhallinyarada adduunka. Qiyaastii 61% ragga ay da'doodu u dhexeeyso 14 ilaa 29 sano waa shaqo la'aan (Dalmar, et al., 2017). Marka lagu daro haweenka shaqo la'aanta ah, tirada dhallinyarada shaqo la'aanta ah waxa ay noqoneysaa 67%, inkastoo ku lug lahaanshaha gabdhaha ee dhallinyaradan burcadda ah aan weli lasoo sheegin. Sidaas darteed, shaqo la'aan iyo dhaqaale la'aan ayaa dhalin karta inay dhallinyarada ku biiraan Ciyaal Weero iyo kooxaha kale ee dambiyada sameeya ee dhibaateeya bulshada Muqdisho.

Soo gelitaanka maandooriyaha ee Soomaaliya iyo gobolka Banaadir, gaar ahaan, ayaa saameyn ballaaran ku leh fal-dambiyeedyada iyo kooxaha dhalinyarada ah ee dadka dhibaateeya. Dhakhaatiirta, xarumaha dhaqancelinta, iyo Ciidanka Booliska Soomaaliyeed ayaa ka digay isticmaalka maamdooriyaha kusii badanaya magaalada Muqdisho. Sida uu sheegay afhayeenkii hore ee booliska, isticmaalka maandooriyaha ayaa wax caadi ah u noqday dhalinyarada burcadda ah iyo kuwa dhaca ka geysta magaalada Muqdisho. Maandooriyaha ayaa isugu jira walxo isku dhafan iyo daroogo ay kamid yihiin tubaakada loo yaqaanno taabuu oo si sharci darro ah dalka kusoo gasha iyo kuwo kale oo si sharci ah dalka kusoo gala balse si khaldan loo isticmaalo, sida narcotics, psychotropics iyo opioids. Sida uu sheegay mid kamid ah dadkii aan wareysannay, inta badan maandooriyaha la isticmaalo waxa laga keenaa dalka Hindiya.

**Daciifnimada iyo Habacsanaanta Dowladda:** Khilaafkii iyo iska-hor-imaadyadii hubeysnaa ee u dhexeeyay madaxda Soomaaliya iyo siyaasiyiinta mucaaradka ee Muqdisho sanadkii 2021-ka kaasoo ka dhashay doorashada ayaa qeyb ka ahaa soo if-baxa Ciyaal Weero. Sida uu sheegay qof la wareystay, xasillooni darradan ayaa fursad u siisay in ay dhismaan islamarkaana ku howlgalaan, iyadoo aanay jirin dadaal lagula tacaalayo oo ay sameynayaan dowladda federaalka iyo Maamulka Gobolka Banaadir. Sida uu sheegay qof kale oo la wareystay, koox dhalinyaro ah oo lamid ahayd kooxdan oo la oran jiray Ciyaal Faa Cali ayaa kasoo if-baxday magaalada Muqdisho dabayaaqadii 1980-aadkii, wakhtigaas oo ay dawladdii ay wiiqeen jabhadihii aakhirkii dumiyey sanadkii 1991. Sikastaba ha ahaatee, Ciyaal Faa Cali waxaa lagu tilmaamay in ay ka rabshad yaraayeen Ciyaal Weero.

Intaa waxaa dheer, sida ka qeybgalayaasha doodda qaarkood ay tilmaameen, daciifnimada hay'adaha dowladda federaalka iyo dowladda hoose ayaa sii kordhinaya dhibaatada. Qaar kamid ah degmooyinka ay kooxaha burcadda ah sida aadka ah u joogaan ayaa ah degmooyin waaweyn (sida Yaaqshiid) waana degmooyin ku yaalla daafaha magaalada xuduudna la leh labada gobol ee deriska la ah gobolka Banaadir. Tirada ciidamada booliska ee degmooyinkaas waa kuwo yar oo aan dabooli karin baahida amni ee ay qabaan bulshada degmooyinkan.

## Waxyaabaha ka Qeyb Qaadanaya

**Nidaamka Garsoorka oo Daciif ah:** Soomaaliya waxay leedahay nidaam cadaaladeed oo jilicsan (Heritage Institute for Policy Studies, 2021). Nidaamka ciqaabta dambiilaha, oo laga sugayey inuu ciqaabo islamarkaana edbiyo dambiilayaasha iyo kooxaha argagixinaya dadka, waa daciif, musuq-maasuq uu ka jiro, islamarkaana fulin karin go'aannadiisa. Waxaa intaa dheer, saraakiisha cadaaladda ayaan helaan mushaar ku filan, taasoo keeneysa musuqmaasuq iyo maamul xumo.

Intii ay socotay doodda SPA qabatay, in badan oo kamid ah ka qeybgalayaasha waxay isku raaceen in hab-dhaqanka garsoorka Soomaaliya uu ka qeyb qaatay soo if-bixitaanka burcadda dhallinyarada ah ee Muqdisho. Ka qeyb galayaasha ayaa sheegay in maxkamadeynta xubnaha Ciyaal Weero ay tahay mid aad u yar, waxaana inta badan lasii daayaa xubnahan muddo yar kadib marka lasoo xero iyadoo aan wax ciqaab ah la marin, kadibna waxa ay sii wataan fal dambiyeedkooda. Waalidiintooda iyo qaraabadooda ayaa inta badan waxa ay ka difaacaan in ay wajahaan cadaaladda iyagoo laaluusha ciidanka booliska ee ka howlgala saldhigyada lagusoo xero kooxahaasi. Sidoo kale, ka-qeybgalayaal kale ayaa walaac ka muujiyay tayada iyo nadaafadda xabsiyada dowladda, taasoo, sida ay sheegeen, keenta in waalidiintu ay ka fogaadaan in wiilashooda xabsiga lagusii hayo, maadaama ay ka walaacayaan caafimaadkooda.

Sikastaba ha ahaatee, markii ay ugu sarreeyeen fal-dambiyeedyada kooxaha burcadda ah bishii Luulyo 2022 ayuu Madaxweyne Xasan Sheekh u sheegay shacabka Muqdisho in aysan ka caban wax-qabadka ciidamada marka odayaasha dhaqanka, xildhibaannada iyo waalidiinta burcadda ay saldhiyada kasii deynayaan dhalinyaradan. Madaxweynaha ayaa sheegay in qaar kamid ah ehellada iyo waalidiinta kooxaha burcadda ah ee gacanta lagusoo dhigo ay u yimaadaan booliska iyagoo sheeganaya inaysan wax dembi ah gelin. Inkastoo aanu madaxweynuhu si cad u sheegin Ciyaal Weero intii uu khudbada jeedinayey, haddana waxa la fahamsanaa in uu iyaga ka hadlayay.

**Saameynta Taban ee Tignoolajiyadda iyo Warbaahinta Bulshada:** Dhalinyarada caalamka qaarkood ayaa baraha bulshada ku wadaaga macluumaad ku saabsan iyagoo dembi galaya si ay u helaan caannimo ama usoo jiitaan dareenka dadka. Maadaama Soomaalidu heysato mid kamid ah heerarka ugu jaban ee xogta mobilada ee helitaanka internetka ee Afrika iyo adduunka, dhalinyarada Soomaaliyeed kama reebbana raadinta caannimada. Muuqaallada la xiriira dhallinyaro rabshado sameynaya ayaa si degdeg ah usoo jiidan kara daawadayaal badan.

Sidaas darteed, waxay u badan tahay in tignoolajiyadda iyo baraha bulshadu ku xiriirto ay ka qeyb qaateen caannimada dhalinyarada burcadda ah ee Muqdisho. Muuqaallada Ciyaal Weero la xiriira waa la daawadaa si weyna waa loogu wadaagaa dhammaan warbaahinta bulshada. Waxa la yaab leh, muuqaallada la xiriira Ciyaal Weero ama ay ku jiraan waxa lagu daawaday 18.5 milyan oo jeer TikTok oo keliya. Daawashadan badan ayaa laga yaabaa inay ku dhiirigeliso inay sameeyaan

rabshado, taasoo u horseedaysa inay ku dhiirigeliyaan jiilka soo koraya inay sameeyaan falalkan naxariis darrada ah.

**Heshiiska ka Baxsan Maxkamadaha:** Sida uu sheegay taliye kuxigeenka booliiska ee mid kamid ah degmooyinka Muqdisho, cadeymo la'aanta ama rabitaan la'aanta isticmaalka maxkamadaha dowladda waxay dhiirigelisaa dhaca iyo dilka. Sarkaalka booliiska ayaa ku dooday in marka kooxaha burcadda ah lasoo qabto ay ehelladoodu dhibanayaasha iyo qaraabadooda kula macaamilaan meelo ka baxsan maxkamadaha dowladda. Sidaas darteed, dhibanayaashu waxay ka laabtaan dacwadii. Waxaa intaa dheer, dhibanayaasha qaar ayaanan maxkamadaha hortooda ku marqaati furin dembiilayaasha dhacay; taa beddelkeeda, waxay alaabtooda uga qaataan saldhigyada booliiska (haddii ay booliisku soo qabteen alaabtii la dhacay). Sidaas awgeed, booliisku ma keeni karo xubnahan burcadda ah maxkamadda sababtoo ah ma heystaan caddeynta dembiyadooda. Waxaa la yaab leh in nin burcad ah oo dad dhacay wax ka yar saacad ka hor wareysiga taliye kuxigeenka lagu wargeliyay booliska. Taliye kuxigeenka ayaa noo sheegay in ninkaasi burcadka ah lasii daayay maalin kahor.

**Dayaca Waalidka:** Kaalinta waalidku waa udub dhexaadka arrintan. Mar ayuu aabbe wiilkiisa keenay saldhiga isagoo ku eedeeyay inuu ka tirsan yahay kooxda Ciyaal Weero. Sikastaba ha ahaatee, waxaa lagu eedeeyay in qaar kamid ah waalidiinta xubnaha kooxahan aysan ka warqabin wiilashooda iyo waxa ay sameeyaan. Sababtu waxa ay noqon kartaa xiriirka aan wanaagsaneyn ee ka dhexeeya waalidka iyo wiilashooda ama waalidka oo aan ka warqabin halka ay wiilashooda joogaan. Intaa waxaa dheer, qaar kamid ah xubnaha burcaddan waxay noqon karaan dhalinyaro qoysaskoodu burbureen oo aanu waalidkood la socon xaaladdooda.

## Maxay Dowladdu ka Qabaneysaa Ciyaal Weero?

Si xaaladda loo xakameeyo, Ciidamada Booliska Soomaaliyeed ayaa bartamihii bishii June ee sanadkan 2022 billaabay "Howlgalka Samakaab", waxaana howlgalkan inta badan lagu bartilmaameedsaday degmooyinka ugu badan oo ay dhibaatadu ka dhacday, sida Kaaraan, Yaaqshid, iyo Dharkeenley. Waxa uu sidoo kale howlgalku gaaray qaar kamid ah degmooyinka ay dhibaatada Ciyaal Weero ku yar tahay. Dhowr todobaad kadib markii uu howlgalku bilowday ayay boolisku ku dhawaaqeen inay soo gebagebeeyeen wajigii koowaad, islamarkaana ay gacanta kusoo dhigeen tobannaan kamid ah Ciyaal Weero oo ay kusoo bandhigeen shir jaraa'id.

Sikastaba ha ahaatee, bilo kadib markii uu bilowday howlgalka Samakaab, lanasoo gebagebeeyey wajigiisii koowaad, weli reer Muqdisho ma arkin isbeddel. Waxaa intaa dheer, diiradda dowladda waxa ay u muuqataa in ay u weecatay howlgallada amniga ee ka socda koonfurta iyo bartamaha Soomaaliya oo ay wadaan ciidamada xoogga dalka iyo kuwa 'Macawisley' ee ka dhanka ah al-Shabaab, taasoo muujineysa in culeyska Ciyaal Weero ee Muqdisho ay u badan tahay in aysan isbedeli doonin dhawaan.

## Saameynta ay Ciyaal Weero ku Yeesheen Shacabka Muqdisho

Soo ifbaxa dhalinyarada Ciyaal Weero ayaa saameyn weyn ku yeelatay shacabka Muqdisho. Kooxdan dhalinyarada ah ayaa si arxan darro ah dadka u dila, jirdil iyo dhacna u geysta. Lama oga tirada guud ee dadka ay dileen Ciyaal Weero. Sikastaba ha ahaatee, afhayeenkii hore ee Booliska, Cabdi Fitaax Aadan Xasan, ayaa xaqiijiyay in ay Ciyaal Weero dileen ugu yaraan saddex qof horaantii sanadkan. Kooxdan dambiilayaasha ah ayaa dilay dad badan tan iyo markii afhayeenka booliisku uu sheegay tirada dadka ay dileen, oo ay ku jiraan macalin jaamacadeed, arday dhalinyaro ah, iyo macalin dugsi Qur'aan. Inta badan dadkan ayaa lagu dilay falal dhac ah.

Waxaa intaa dheer in dhac hubeysan uu kusoo noq noqday qeybo badan oo kamid ah magaalada Muqdisho. Kooxo ku hubeysan bastoolado, mindiyo iyo qoryaha fudud, ayaa dadka argagax geliya, sidoo kalena dhaca. Meelaha qaar, waxay u badan tahay in ay burcaddu ku dhacaan haddii aad bannaanka u baxdo habeenkii, waxaana lagu dili karaa haddii aad iska caabiso ama aad isku daydo inaad baxsato. Mararka qaar, kooxaha burcadda ah ayaa isticmaala bajaaj, iyagoo iska dhigaya tagsi. Bajaajta marka ay koraan kadib ayaa dadka la afduubaa waxaana la geeyaa meelo gaar ah oo lagu dhaco.

Dhinaca kale, dadka qaar ayaa isaga cararay guryahooda si ay uga fogaadaan kooxahan burcadda ah, waxayna u guureen degmooyin kale oo ay dareemayaan in amnigooda uu wanaagsan yahay. Sida uu sheegay qof aan wareysanay oo ku nool mid kamid ah deegaannadaas, degmooyinka Kaaraan, Dharkeynley, Wadajir iyo kuwa kale oo hoos yimaada ayaa kamid ah meelaha amnigooda uu sii xumaaday sababo la xiriira falalka Ciyaal Weero. Intaa waxaa dheer, dadka deggan xaafadahan ayaa ku qasbanaaday inay goor hore soo guryo noqdaan maadaama ay sii kordhayaan khatarta amni oo ay geysanayaan Ciyaal Weero.

Sidoo kale, Ciyaal Weero ayaa si weyn saameyn ugu yeeshay isu-socodka dadka ee Muqdisho. Si ay uga baxsadaan dhalinyaradan, islamarkaana ay uga fogaadaan in la qabto iyagoo socda, dadka reer Muqdisho qaarkood waxay xadidaan dhaq-dhaqaaqooda, mana soo aadaan masaajidyada xilliyada fiidkii. Intii lagu guda jiray bisha barakeysan ee Ramadaan, dadka ku dhaqan xaafadaha qaar waxa ay aadi kari waayeen masaajidyada ay ku tukanayeen salaadaha habeenkii iyo saqda dhexe (Taraawiixda iyo Tahajudka) waxaana ay ku qasbanaadeen in ay guryahooda ku sugnaadaan ilaa waaga ka baryayo.

Falalka amni darro ee saameeyay qaar kamid ah xaafadaha magaalada Muqdisho ayaa waxaa ka dhashay in bulshada qaar ay abaabulaan ciidamo roondeeya xaafadaha ay degan yihiin. Bishii Luulyo 2022, odayaal dhaqameedyo ayaa iskood isu abaabulay, waxayna koox ilaalo xaafadeed ah ka sameeyeen xaafadda Ceel Wardheere (ee degmada Dayniile). Ilaaladan waxay bilaabaan roondo kadib 11:00 saqda dhexe, waxayna istaajiyaan oo ay su'aalo weydiiyaan dhalinyarada habeenkii socda. Mushaarka ilaaladan xaafadda ayaa laga qaadaa dadka deegaanka, waxaana guri kasta laga qaadaa $5 bishii.

## Xalka

TDowladda Federaalka Soomaaliya, Maamulka Gobolka Banaadir, iyo bulshada ku nool gobolka Banaadir, waxay tixgelin karaan inay qaadaan tillaabooyinka soo socda si xal waara loogu helo xaaladdan cusub ee Ciyaal Weero:

1. Soo dejinta iyo isticmaalka maandooriyaha waa in si adag loo xakameeyo. Dhammaan badeecadaha lasoo dhoofiyo waa in maamullada kastamyada dekadaha, garoomada diyaaradaha iyo kastamyada dhulka ay si fiican u hubiyaan, si looga hortago soo dejinta maandooriyeyaal. Sida ay dhakhaatiirtu sheegeen, maandooriyaha waa maaddooyinka ay isticmaalaan dhalinyarada Muqdisho, guud ahaan, gaar ahaan kooxaha burcadda ah. Intaa waxaa dheer, isku-dhafka walxo badan ayaa sidoo kale si baahsan loo isticmaalaa. Xaaladaha qaarkood, waxaa la sheegay in isticmaalka xad dhaafka ah ee daawooyinkan ay sababeen dhimasho. Somali Bureau of Standards oo lagu dhisay Xeerka Tayada iyo Halbeegga Soomaaliyeed ee Lr27 lana howlgeliyey 2020 waa in uu si firfircoon uga shaqeeyo xakameynta badeecadaha dibadda laga keeno. Waxa kale oo loo baahan yahay in kormeer iyo baaritaan lagu sameeyo kastamyada. Nidaaminta farmashiyaasha sidoo kale waa muhiim.

2. Dowladdu waa in ay sameysaa istiraatijiyad dhammaystiran oo lagula tacaalayo burcadda. Ma habboona in la raadiyo xal marka ay dhibaatadu gaarto heer baaxad leh. 'Howlgalka Samakaab' waxa uu booliisku billaabay horraantii 2022-kii xilli horey loo geystay dhibaatooyin badan. Istaraatiijiyaddu waa inay ku jirtaa tallaabooyin ka-hortag ah, oo ay ku jiraan ka-hortagga sababaha keena iyo kuwa ka-qeyb-qaata soo if-baxa Ciyaal Weero. Marka labaad, qorshe hawleed faafaahsan oo ku saabsan sida loo wajahayo waa in la dejiyaa. Qorshuhu, tusaale ahaan, wuxuu sharxi karaa sida xubnaha Ciyaal Weero loola dhaqmayo inta lagu jiro howlgallada, iyadoo la tixgelinayo inay jiraan caruur aan qaan-gaarin oo ku lug leh, iyo sidoo kale hagaajinta xaaladaha xarumaha dadka lagu hayo. Marka saddexaad, istaraatiijiyaddu waa inay sidoo kale lahaataa tallaabooyin howlgalka kadib ah.

3. Maamulka Gobolka Banaadir waa in uu dejiyaa hab hoos kasoo billaabanaya oo wax looga qabanayo Ciyaal Weero. Haddii ay taasi dhacdo waxaa fududaan lahayd in degmooyinka gobolka Banaadir iyo ciidamada booliska ay la falgalaan dadka deegaanka, wacyi gelin sameeyaan, islamarkaana ay ogaadaan cid kasta oo ku lug yeelata fal-dambiyeedyadaas, iyadoo odayaasha xaafadaha ay gacan ka geysanayaan sidii gacanta loogu soo dhigi lahaa dembiilayaasha. Sidoo kale, wakiillada iyo ururrada dhalinyarada waa in ay sare u qaadaan codkooda oo ay khatarta la socodsiiyaan dadka u xilsaaran. Maadaama arrintani ay khuseyso shacabka, badqabkooda, iyo hantidooda, dhammaan dhinacyada ay khuseyso, sida waalidiinta, macallimiinta, dhalinyarada, ganacsatada, xarumaha waxbarashada, Maamulka Gobolka Banaadir, iyo dowladda federaalka waa in ay arrintan si dhab ah u qaataan oo ay wacyigelin uga sameeyaan. Sidoo kale waa in ay qaadaan tallaabooyin looga hortagayo in kooxahaas ay ku fidaan magaalada oo dhan iyo gobollada kale. Waxay u arkaan dad badan in dhibaatadani ay ka jirto degmooyinka daraftayada oo ay noqon doonto dhibaato guud marka burcaddu ay ku faafaan bartamaha magaalada ama ay kasoo if-baxaan magaalooyinka kale.

4. Shaqo abuurku waa muhiim si wax looga qabto dhalinyarada burcadda noqoneysa iyo dembiyada ay galaan. Waa masuuliyadda dowladda, ganacsatada, iyo cid kasta oo ay khuseyso in shaqo abuur loo sameeyo dhalinyaradaas. Aad bay u tamar badan yihiin, tamartoodana waxay u baahan tahay in laga faa'iidaysto oo loo jiheeyo danta ummadda iyadoo loo abuurayo shaqo, laguna qalabeeynayo xirfad iyo farsamo. Waxaa jirta rajo ah in qaar kamid ah xubnaha Ciyaal Weero lagu qancin karo inay joojiyaan dembiyada haddii loo abuuro fursado shaqo maadaama qaar kamid ah xubnaha burcadda ah ay dhigtaaan ama horey usoo dhigteen iskuullo.

## Tixraac


Dalmar, M. S., Ali, A. Y. S. & Ali, A. A., 2017. Factors Affecting Unemployment in Somalia. Journal of Economics and Sustainable Development, 8(22).

Heritage Institute for Policy Studies, 2021. Rebuilding Somalia's Broken Justice System: Fixing the Politics, Policies and Procedures. Heritage Institute for Policy Studies, January.



Somali Public Agenda

Somali Public Agenda

Mogadishu - Somalia

+252(0)85 8358

info@somalipublicagenda.org

<https://www.somalipublicagenda.org>

@somalipubagenda